DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# BOROTOKOOLKA KU MEEL-GAARKA AH EE QAYBINTA DHUL HOY U NOQDA KUWA MUTAYSTAY EE QAXOOTIGA SOO LAABTAY IYO BARAKACAYAASHA GUDAHA, 2019

# DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Borotokoolka ku Meel-gaarka ah ee Qaybinta Dhul Hoy u Noqda kuwa Mutaystay ee Qaxootiga soo Laabtay iyo Barakacayaasha Gudaha, 2019

## Tusmo

ARAR .......... 4

Qodobka 1 – Qaxootiga soo laabtay iyo Barakacayaasha Gudaha ee Mudan .......... 6

Qodobka 2 – Haynta Dhul la Bixiyo .......... 7

Qodobka 3 – Matalaadda Qaxooti soo Laabte ah iyo Barakace Gudaha ah .......... 7

Qodobka 4 – Dadka Mudnaanta la Siinayo Xilliga Qoondayta Dhulka .......... 8

Qodobka 5 – Go'aaminta ka Faa'iidaystayaasha Qoondaynta Dhulka .......... 8

Qodobka 6 – Go'aannada Qoondaynta Dhulka .......... 8

Qodobka 7 – Go'aannada Ku Saabsan Baaxadda iyo Ujeeddada Dhulka la Qoondaynayo .......... 9

Qodobka 8 – Qiimaynta Suurto-galnimada Horumarin Mustaqbal ee Mashaariicda la Ansixiyay .......... 9

Qodobka 9 – Masuuliyadaha Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir .......... 10

Qodobka 10 – Waajibaadka ka Faa'iidaystayaasha .......... 10

Qodobka 11 – Lahaansho Rasmiya iyo mid ku Meel-gaar ah .......... 11

Qodobka 12 – Dhul aan la Bixin Karin .......... 11

Qodobka 13 – Qoondayn Horay u Jirtay oo la Ansixiyo .......... 11

Qodob 14 – Dhaqan-gelinta Borotokoolka ku Meel-gaarka ah .......... 11

Qodobka 15 – Habraaca Hirgelinta Xeer Maamulkan .......... 12

Qodobka 16 – Billaabashada Borotokoolka .......... 12

Qodobka 17: Dib-u-eegis iyo Wax ka Baddalid .......... 13

## ARAR

Iyadoo la tix-galinayo qodobka 21(1) ee Dastuurka ku Meel-gaarka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo qof walba oo Jamhuuriyadda deggan u dammaanad qaadaya xoriyadda dhaq-dhaqaaqa, xorriyadda inuu xusho/xulato hoyigiisa/geeda iyo inuu dalka ka baxo;

*Iyadoo carrabka lagu xajinayo* qodobka 43(1) ee Dastruuka ku Meel-gaarka ah oo dhigaya in "dhulka yahay khayraadka koowaad ee Soomaaliya iyo saldhiga nolosha dadka"; iyo iyadoo carrabka lagu xajinayo faqrada 3[aad] ee isla qodobka waajibka ay saarayso Xukuumadda Federaalka ee ah "in ay dejiso siyaasad dhuleed oo heer qaran ah oo si joogto ah dib-u- eegis loogu sameeyo;"

*Iyadoo maanka lagu hayo* in Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka ay "dejinayaan siyaasad dhuleed oo heerkooda ah" sida uu qabbo qodobka 43(3)(g);

> *Iyadoo lagu baraarugsan yahay* in qodobka 12(1) uu dhigayo in "Xuquuqaha asaasiga ah iyo xorriyadda lagu aqoonsaday qaybtan ... la dhowraa mar kasta oo sharci la fulinayo" iyo in "qof kasta, hay'adaha Dawladda ee heer kasta iyo hay'adaha gaarka ah iyo saraakiisha Dawladdu marka ay gudanayaan xilkooda ay ilaaliyaan";

*Iyadoo carrabka lagu xajinayo* qodobka 26(1) ee qof walba u dammaanad qaadaya xaqa "in uu hanti yeesho, ku dhaqmo, ku naalloodo, iskana gado ama iska wareejiyo";

*Iyadoo mar kale carrabka lagu xajinayo* xaqa asaasiga ee guryaynta iyo hantida ee ay dammaanad qaadeen heshiisyada iyo xeerarka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha ee ay ansixisay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sida –

b. Baaqa Caalamiga ee xuquuqda Aadanaha, Qodobka 25(1) iyo 17;

t. Heshiiska Caalamiga ee Xuquuqaha Dhaqaale, Bulsho iyo Dhaqan, Qodobka 11(1);

j. Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Madaniga iyo kuwa Siyaasadeed, Qodobka 17;

x. Axdiga Caalamiga ah ee Ciribtirka Dhammaan Noocayada Isir Faquuqa ah, Qodobada 5(e) (iii) iyo15(d), (v);

kh. Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Caruurta, Qodobka 27(3);

d. Heshiiska la Xiriira Maqaanka Qaxootiga, Qodobbada 21 iyo 13;

r. Mabaad'iida Hagta Barakaca Gudaha, Mabda' 18 iyo 21;

s. Mabaad'iida guryaynta iyo Hanti u Celinta Dadka Barakacay (Mabaad'iida Pinherio), Mabda' 8;

(sh) Guddiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka oo ku

fasiray dulucda xuquuqda faaladiisa guud ee 4 iyo 7;

(dh) Heshiiska Xuquuqaha Dadka Naafada ah, Qodobada 28 iyo 29(1) (a); iyo

(c) Heshiiska Midowga Africa ee Difaacista iyo Taakulaynta Dadka ku Dhex Bara-kaca Dalkooda Gudihiisa ee Africa (Axdiga Kampala), Qodobada 9(2) (g), 11(4) iyo (5);

*Iyadoo aad loo danaynayo* baahida deg-degga ah ee loo qabo in xal waara loo helo barakacayaasha gudaha iyo qaxootiga soo laabtay;

*Iyadoo maanka lagu hayo* go'aanka Xukuumadda Federaalka Soomaaliya oo ku aaddan ansixinta tallaabo ku meel-gaar ah oo barakacayaasha gudaha iyo xaqootiga soo laabtay siinaysa dammaanad daboolidda baahida deegaan iyo guryayn;

*Iyadoo la xusuusan yahay* wixii ka soo baxay la tashiyo baaxad leh oo lala sameeyay kuwa ay khusayso oo heer qaran iyo heer caalamiba ah;

*La garawsan yahay* in fikradda ku saabsan guryayn, dhul iyo hanti ay soo galayso xuquuqaha asaasiga ah ee guryayn, dhul iyo hanti ee lagu helayo xeer-dhaqameedka ama qaanuunka, oo ay ku jirto hantida guud ama gaarka ah ee dhul ama guryayn; oona

Iyadoo la tixgelinayo qodobka 99[aad] ee Dastuurka ku Meel-gaarka ah oo Golaha Wasiirrada awood u siiyanaya arrimo ay ka mid tahay, (a) dejinta siyaasadda guud ee Xukuumadda iyo dhaqangelinteeda; iyo (b) oggolaanshaha iyo fulinta xeerarka maamulka, si waafaqsan shuruucda-

***Ayuu iminka,* Golaha Wasiirradu ansixiyay borotokoolka (xeer maamulka) soo socda:**

## QODOBKA 1 – QAXOOTIGA SOO LAABTAY IYO BARAKACAYAASHA GUDAHA EE MUDAN

(1) Qaxooti soo laabtay oo mudan waxaa laga wadaa qof –

b. haysta dukumiinti caddaynaya in Dawaladda Federaalka ee Soomaaliya ay u dii-waan-galisay inuu yahay qaxooti soo laabtay; ama

t. haysta foomka dib u laabashada khiyaariga (VRF) ah oo la hubiyay oo ka marag kacaya ku soo laabadkiisa waddanka ama halka uu ka soo jeedo amaba uu deggan yahay; oo

j. aan lahayn dhul ama guri Soomaaliya ah oo ku qoran magaciisa, magaca xaaskiisa ama magaca ilmo yar.

(2) Kalmadda lahaansho ee ku xusan faqrada 1(c) waxaa laga wadaa haysashada warqadaha sharciga ah oo muujinaya lahaanshaha dhulka ama guryaha, ama xaq sheegasho oo ku salaysan lahaansho bulsho ama hab dhul yeelasho oo xeer-dhaqameed ah.

(3) Marka la raacayo ujeedka Borotokoolkan(Xeer Maamulkan), qaxootiga ku soo laabta si iskiis ah (waa midka soo laabtay isaga oon haysan VRF) waxaa loo aqoonsanayaa qaxooti soo laabtay haddii uu keeno dukumiinti saxnaantiisa la xaqiijiyay oo tusinaya in qofkaasu qaxooti ku ahaa waddan kale.

(4) Marka la raacayo ujeedka Borotokoolkan, soo laabte kasta oo leh boos dhul ah amaba guri balse aan ku noqon karin sababo khiyaarkiisa ka baxsan dartood oo lana xiriira barakiciisii hore waxaa loo tixgelinayaa soo laabte mudan.

(5) Barakace gudaha ah oo mudan waa qofka –

b. haysta dukumiinti sax ah oo ay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya bixisay kaas oo ka marag kacaya maqaamkiisa/keeda barakacanimo ee gudaha dalka ah:

Hayeeshee barakacaha gudaha ee aan haysan dukumiinti sharci ah oo tilmaamaya maqaamkiisa waxaa, baddalkii dukumiintiga laga aqbali karaa, marka ay munaasab tahay, weer ay dhaari weheliso ama markhaati-fur qaanuuneed oo xubanaha kale ee qofkaas beeshiisa ama deegaankiisa ahi sameeyaan; oo

t. aan lahayn dhul ama guri Soomaaliya ah oo ku qoran magaciisa, magaca xaaskiisa ama magaca ilmo yar.

(6) Kalmadda lahaansho ee ku xusan faqrada 5(b) waxaa laga wadaa haysashada warqadaha sharciga ah ee muujinaya lahaanshaha dhulka ama guriga, ama xaq sheegasho oo ku salaysan lahaansho bulsho ama hab dhul yeelasho oo xeer-dhaqameed ah.

(7) Marka la raacayo ujeedka Borotokoolkan, barakace gudaha oo mudan oo kasta oo leh boos dhul ah amaba guri balse aan ku noqon karin sababo khiyaarkiisa ka baxsan dartood oo lana xiriira barakiciisii hore waxaa loo tixgelinayaa barokace gudaha ah oo mudan.

## QODOBKA 2 – HAYNTA DHUL LA BIXIYO

Haddii dhul dawladeed oo la bixiyo aan lagu hayn degmo, waxaa barakacayaasha gudaha iyo qaxootiga soo laabtay ee mudan dib u dejin loogu dirayaa gobollada dariska iyadoo si dhaw loola tashanayo maamulka ay khusayso, dagaamayntaas baddiilka ahna (waa haddii la xamili karayee) waxaa la samaynayaa marka ay ansixiso dawladda hoose ee meesha la degayo.

## QODOBKA 3 – MATALAADDA QAXOOTI SOO LAABTE AH IYO BARAKACE GUDAHA AH

(1) Qaxootiga soo laabtay ama barakacaha gudaha waxa uu matali karaa oo kaliya naftiisa ama qayskiisa, mana matali karo dadka kale.

(2) Qaxootiga soo laabtay ama barakace gudaha ah oo uu ka masuul yahay qof aan qaangaarin, kuwa dhimirka naafada ka ah ama caruurta aan qoys haysan waxaa matali kara qaraabadooda durugsan, ama ruux ay isku beel ama deegaan yihiin oo uu ogolaaday ilmahu ama qofka dhimirka naafada ka ah.

(3) Iyadoon wax loo dhimayn sida guud ee faqrada 2$^{aad}$ ee qodobkani u dhigantahay, qaxootiga soo laabtay ama barakacaha gudaha oo dhimirka naafada ka ah ee aan haysan qoys matala waxaa masuuliyadda matalaaddiisa yeelanaya hay’adda ay khusayso ee xukuumadda.

## QODOBKA 4 – DADKA MUDNAANTA LA SIINAYO XILLIGA QOONDAYTA DHULKA

Marka dhul la qoondaynayo waxaa mudnaanta la siinayaa dadka nugul oo ay ku jiraan, aanse ku koobnayn, qaxootiga soo laabtay iyo barakayacayaasha gudaha ee ah naafada, qofka lammanaha ka dhintay, waayeelka ama cid xanuun ku daba-dheeraaday.

## QODOBKA 5 – GO'AAMINTA KA FAA'IIDAYSTAYAASHA QOONDAYNTA DHULKA

Iyadoo looga jeedo in qoondayta dhulku si caddaalad ah u dhaco ayaa waxaa masuuliyadda go'aaminta ka faa'iidaystayaasha qoondaynta dhulka  iska leh hay'ada ay khusayso ee Dawladda Xubinta ka ah  Dawladda Federaalka  ama Maamulka Gobolka banaadir, iyo waliba maamullada degmooyinka iyo dawladaha hoose iyagoo la tashanaya wakiilada Hay'adda Qaranka ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha Gudaha .

## QODOBKA 6 – GO'AANNADA QOONDAYNTA DHULKA

Dawaladaha Xubnaha ah Dawladda Federaalka iyo Maamulka Gobolka Baaadir ayaa ka masuul ah –

- b. go'aaminta ka faa'iidaystayaasha qoondaynta dhulka;
- t. gaarista go'aammo munaasab ah oo la xiriira qoondayta dhulka iyo degaanno u diyaarinta qaxootiga soo laabtay iyo barakacayaasha gudaha, iyagoo la shaqaynaya Hay'adda Qaranka ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha;
- j. suurtogelinta ilaalinta xuquuqda dadka barakacayaasha iyo qaxootiga soo laabtay , magdhaw iyo siinta xaq  sixid qaanuuneed oo dadka u furan; iyo
- x. ka hortagista iyo la tacaalista khilaafaadka ka yimaada hannaanka dhul qoondaynta.

## QODOBKA 7 – GO'AANNADA KU SAABSAN BAAXADDA IYO UJEEDDADA DHULKA LA QOONDAYNAYO

(1) Hay'adaha Dawladda Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka ah iyo Maamulka Gobalka Banaadir ayaa, iyagoo raacaya xeerarka markaas dhaqan-galka ah, ka masuul ah cayimidda xaddiga munaasabka ah iyo ujeedka laga leeyahay dhulka la siinayo ka faa'iidaystaha qoondaynta dhulka e mudan.

(2) Waaxaha qaabilsan horumarinta magaalooyinka iyo guryaynta ee heer Federaal, Goboleed ama Dawlad Hoose waxaa ku waajib ah in ay dhiibaan khariidadaha la xiriira aagagga iyo qorshayaalka dhul ee lagu xusay faqrada 1aad ee qodobkan, si loo sahlo u samaynta adeegyada loo baahanyahay.

## QODOBKA 8 – QIIMAYNTA SUURTO-GALNIMADA HORUMARIN MUSTAQBAL EE MASHAARIICDA LA ANSIXIYAY

(1) Hay'adda ay khusayso ee Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka ah ama Maamulka Gobolka Banaadir oo la tashanaya Hay'adda Qaranka ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha Gudaha, ayaa ka masuul ah –

   b. xaqiijinta ka faa'iidaystayaasha qoondaynta dhulka si waafaqsan Siyaasadda Qaranka ee ku aaddan Qaxootiga soo laabtay iyo Barakayaasha Gudaha; waxa ayna

   t. iyagoo la tashanaya Hay'adda Qaran ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha Gudaha iyo Wasaaradda Qorshaynta ay qiimayn ku sameynayaan suurtogalnimada horumarin mustaqbal ee mashaariicda la ansixiyay.

(2) Iyada oo dawladda ka wakiil ah ayay Hay'adda Qaran ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha Gudaha–

   b. sare u qaadaysaa iskaashi ay yeeshaan hay'adaha qaranka iyo kuwa caalamiga ah si loo sugo taageerista mashaariic qaxootiga soo laabtay iyo barakacayaasha gudaha loogu hormarinayo guryayn iyo adeegyada bulsho ee kale; waxa ayna

   t. samaynayaan habab iyo halbeegyo loo raaco horumarinta guriyaynta.

## QODOBKA 9 – MASUULIYADAHA DAWLADAHA XUBNAHA KA AH DAWLADDA FEDERAALKA IYO MAAMULKA GOBOLKA BANAADIR

(1) Hay'adda ay khusayso ee Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir, oo la tashanaya Hay'adda Qaran ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha Gudaha, ayaa ka masuul ah –

b. Dhul u qoondaynta ka faa'iidaystayaasha mudan;

t. la xaajoonta kuwa iska leh dhulka gaarka ah iyo bulshada martida loo yahay, iyo siinta mulkiilayaasha qiimo-celin ku filan; iyo

j. samaynta nidaam qiimo goyn oo munaasab ah oo loo isticmaalo dhulka dawladdu leedahay.

(2) dakhliga laga qabtay dhul bixinta waxaa maamulaya wasaaradda maaliyadda ee heerka xukuumadeed ee hadba ka talisa dhulku meesha uu ku yaallo waxaana lagu bixinayaa baahiyaha iyo

## QODOBKA 10 – WAAJIBAADKA KA FAA'IIDAYSTAYAASHA

(1) Shakhsiyaadka ama kooxaha dhulka loo qoondeeyay waxaa ku waajib ah arrimahan soo socda:

b. in ay dhulka ka dhisaan hoy munaasab ah si waafaqsan sharciyada markaa dhaqan-galka ah;

t. ka faa'iidaystihii aan awoodin in dhulkii la siiyay uu ka dhiso hoy munaasab ah waxa uu caawimo ka raadsan karaa hay'adaha Soomaaliya ama ururrada maxaliga amaba heer caalami, laakiinse inay dhisan kari waayeen ka faa'iidaystaha loogala laaban maayo amaba xaqiisa isticmaal ee dhulka lama xakamaynayo; iyo

j. in dhulka loo qoondeeyey aanay gadin ama aanay kirayn ugu yaraan muddo toban (10) sano ah.

(2) Dhulkii la qoondeeyey dib ayaa loo soo ceshan karaa ama ka faa'iidayste kalaa lagu wareejin karaa haddii maamulka ama hay'adda ay khusayso ay ku qanacdo in qofka loo qoondeeyey dhulka uu ku helay si khilaafsan qodobbada khuseeya mutaysiga ee borotokoolkan.

(3) Dawladda hoose waxa ay ka masuul tahay keenista qorshe guryayn oo munaasab ah oo waafaqsan duruufaha dhaqaale ee kuwa dhulka iska leh, iyo nakhshadaynta degaanka cusub.

(4) Dawladda hoose oo la tashanaysa Hay'adda Qaran ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha ayaa ka masuul ah maamulista iyo kor-joogtaynta dhulka la dajiyo barakacayaasha gudaha inta aan wali la siin dukumiintiga lahaanshaha rasmiga ah.

## QODOBKA 11 – LAHAANSHO RASMIYA IYO MID KU MEEL-GAAR AH

(1) Ka faa'iidaystayaasha dhul ku hela borotokoolkan waxaa maamulka degaanku uu, marka hore, siinayaa caddayn lahaansho oo ku meel-gaar ah, waxaana lagu diiwaan gelin diiwaanka dhulka/guryaha.

(2) Dabadeedna, shan sano ka dib ayaa dawladda hoose ee ay khusayso ay siinaysaa caddayn lahaansho oo rasmi ah.

## QODOBKA 12 – DHUL AAN LA BIXIN KARIN

Dhulka aan la falin ee loo isticmaalo kayn ahaan, dhulka la beerto iyo dhulka loo isticmaalo mashaariicda kaabayaasha dhaqaalaha lama bixin karo.

## QODOBKA 13 – QOONDAYN HORAY U JIRTAY OO LA ANSIXIYO

Haddii ansixinta borotokoolkan horteed goobo loo diyaariyey qoondayn iyadoo la raacay hannaankii loo baahnaa, dhul bixintaas lagama daba-tagayo oo sideeda ayey u jiraysaa.

## QODOB 14 – DHAQAN-GELINTA BOROTOKOOLKA KU MEEL-GAARKA AH

Dhaqan-gelinta borotokoolkan waxaa iska leh hay'adaha ay khusayso ee Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir oo la tashanaya Hay'adda Qaran ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha.

## QODOBKA 15 – HABRAACA HIRGELINTA XEER MAAMULKAN

Marka la ansixiyo Borotokoolkan, Hay'addaha ay khusayso ee Federaalka, Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir waxa ay iska kaashanayaan diyaarinta habraacyo lagu hirgelinayo Borotokoolkan marka la helo hannaanada socodsiinaya Borotokoolka.

## QODOBKA 16 – BILLAABASHADA BOROTOKOOLKA

Dhaqan-galka Borotokoolkani waxa uu billaabmayaa marka uu ansixyo Golaha Wasiirrada ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

## QODOBKA 17 – DIB-U-EEGIS IYO WAX KA BADDALID

Haddii iyo markii ay baahi timaaddo, Golaha Wasiirrada ee Jamhuuriyadda Federaalka ayaa Borotokoolkan(Xeer Maamulkan) ku samayn kara dib-u-eegis, wax ka baddalis iyo baddalisba.

Taariikh -------------------------------- / ----------------------------------- /2019

SIXIIXAY:____________________________________________

Rai'sulsul Wasaaraha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya